



## Ku madadaal ranjiyeynta iyo wax sawirka

Wax ranjiyeynta iyo sawirka wuxuu ilmahaada ku caawinayaahor marka fejignaanta, hal-abuurnimada, iyo xirfadda ay u baahan doonaan markii ay wax qorayaan.

Isticmaal qalabyo calaamad sameeyo ee ka duwan sida qalimada dhukay ka sameysan, qalimaadyo, xumbada xiirashada iyo ranji. Waa maad in la isticmaalo biyo iyo burashka ranjiyeynta dhagaxyada geeska waddada ama beerta.

### Talada xiddigta

Hal-abuur ahow. Ku dhirrigeli ilmahaada inuu sameeyo calaamado, wax sawiro iyo isku dhejiyo sawiro ka kooban waxyaabo kala duwan sida baalaha shimbirta qoriyo iyo qolofyo.

Sawirada aad ugu jeceshahay ka soo goy majaladda iyo samee sawir isku dheg-dhegan.

### Sida aad u samayn kartid buuggaaga xasuusta Waxaad u baahah tahay

- Buug wax lagu qoro
- Qalin, laabis iyo qalinka laga sameeyey dhukay
- Sawiro
- Majallado iyo journaalo
- Maqaska carruurta ku ciyaaraan
- koollo

### Waxaad sameynayso

- Ku caawi ilmahaada sharraxidda dhinaca sare ee buuggooda xasuusta. Magaciisa isla qora.
- Ku dar ereyoyin ama sawiro ku saabsan waxa ay jecel yihiin, sida cunto, meelo ama waxyaabo ay ku ciyaaraan, ama sawirada qoyskaaga ama xayawaankaaga daba-joogga.
- Markaad dibedda u baxdaan aruuri tikidhyada baska iyo kuwo kale iyo ilmahaada ha ku dhejiyo buugga.
- Isku day in ilmahaada isticmaalo waxyaala bir-birqa, ranji, sawirada koollada leh ama wax kale ee buuggooda xasuusta ka dhigaayo mid maad iyo midabyo badan leh.

### Fikrada sheekaysiga

Kala hadal ilmahaada wuxuu xariiqey iyo weydii wixii ay sawireen. Ka xulo qaab iyo muuqaal ee la garan karo adigana qaar ka sawir.

